

TALLAALKA HEPATITIS "B"

MAXAAD U BAAHANTAHAY INAAD OGAATO

1 Maxaa la isku tallaalaa?

Cagaarshow (Hepatitis B) waa jirro khatar ah.

Fayruska ama jeermiska Hepatitis B (HBV) wuxuu keeni karaa jirro muddo ah oo sababi-karta:

- rabitaanka cunada oo yaraada
- tabardarri
- shuban iyo mantag
- midabka indhaha ama jirka oo jaallo isku badala
- xanuun ku dhaca muruqyada, kalagoysyada iyo caloosha

Wuxuu kale oo sababi karaa xanuun daba-dheeraada oo u horseeda:

- dhaawac beerka gaara
- kansar beerka ku dhaca
- geeri

In ku dhow 1.25 malyuun oo qof oo maraykanka ku nool ayaa qaba jeermiska Hepatitis B.

Sannad walba waxa lagu qiyaasay in:

- 80,000 oo qof oo u badan dhalinyaro ay qaadaan fayruska HBV
- 11,000 oo qof ayaa isbataalka u galo hepatitis B
- 4,000 ila 5,000 ayaa u dhinta hepatitis B.

Tallaalka Hepatitis B waxuu joojin karaa jirrada hepatitis B. Waa Tallaalkii ugu horeeyey ee la dagaallama kansarka waayo wuxuu joojin kara mid ka mid-ah kansarka beerka.

2 Sidee buu u fidaa jeermiska hepatitis B?

Hepatitis B wuxuu ku fidaa la kulanka dhiiga ama dhecaanka qofka qaba jirrada. Siyaalo badan ayaa cudurka lagu qaadi karaa:

- Isu galmo laba qof oo aan is-ilaalin oo midkood qabo cudurka.
- Marka la wadaago Irbadaha daroogada.
- Marka irbad la isticmaalay ku mudo adoo wax duraya.
- Marka ilmuhu dhalanayaan ee ay hooyadu u gudbisoo fayruska ilmaheeda.

In ku dhow 1/3 dadka qaba Hepatitis B ee ku nool dalka marykanka ma yaqaaniin sida ay u qaadeen xanuunkaas.

3 Qofkee u baahan tallaalka hepatitis B, waqtige se u baahan yahay?

- 1) Qof kasta oo 18 jir ah ama ka yar
- 2) Dadka 18 jir ka weyn ee laga yaabo inay khatar ku sugan yihiin.

Qofka weyn oo halis u ah inuu qaado HBV waxa ka mid ah:

- Qofka u galmooday in ka badan hal gof mudo 6 bilood gudahood
- Ragga u galmooda rag kale
- Qofka u galmooda dad jirrada qaba
- Dadka daroogada isku dura
- Dadka caafimaadka ka shaqeeya oo laga yaabo inay taabtaan ama uu soo gaaro dhiig ama dheecaan qof qaba jirrada
- Dad guri ku wada nool oo qaarkood qabaan jirrada
- Dadka kelyaha ka jirran

Haddii aanad hubin in aad khatar ku jirto iyo in kale la xiriir dhakhtarkaaga ama kal-kaaliyaha caafimaadkaaga.

✓ Waxaa loo baahan yahay inuu qofku qaato 3 jeer tallaalka Hepatitis B sida soo socota. Haddii aad ka habsaanto waqtiga tallaalka ama uu hal tallaalku dhaafto, si deg deg ah u qaado tallaalka ku xiga. Looma baahna in aad soo bilaawdo kulligood mar labaad.

		QOFKEE		
		Cunug hooyadii qabto HBV	Cunug hooyadii aanay qabin HBV	Cunug weyn ama qaan gaar ah ama qof weyn
G O O R M A ?	Tallaal-ka kowaad	Marka uu dhasho ilaa 12 saacadood gudahood	Marka uu dhasho ilaa 2 bilood	Waqtigii la doono
	Tallaal-ka labaad	1-2 bilood gudahood	Marka da'diisu tahay 1-4 bilood (ugu yaraan hal bil kabacdi tallaalka kowaad)	1-2 bilood kabacdi tallaalka kowaad.
	Tallaal-ka Sade-xaad	Marka uu jiro 6 bilood	Marka uu jiro inta u-dhexaysa 6-18 bilood	4-6 bilood ka bacdi tallaalka kowaad

- Tallaalka labaad waa in la qaato ugu yaraan hal bil ka dib markii la qaatay tallaalkii kowaad.
- Tallaalka sadexaad waa in la qaato ugu yaraan 2 bilood ka dib markii la qaatay tallaalka labaad ama 4 bilood ka dib markii la qaatay kii kowaad.
- Tallaalka sadexaad waxa waajib ah inaan la siin carruurta 6 bilood ka yar, waayo waxa suura gal ah inuu yareeyo difaaca jirkoodu u leeyahay jirrooyinka.


Ilmaha da'doodu u dhexayso 11 ilaa 15 waxay u baahanyihiin laba tallaalka oo qura oo ay u dhexayso 4-6 bilood. Wixii tafaasiil ah waxaad weydiisaa dhakhtarkaaga.

Tallaalka Hepatitis B waxa isku mar lala qaadan karaa tallaalo kale.

4**Dadka qaarkii waa in aaney qaadan tallaalka hepatitis B ama waa in ay muddo sugaan**

Waa in aan la siin tallaalka Hepatitis B haddii qofka u leeyahay alarjia khatar ah oo geeri keeni karta, khamiiriyaha burka (baker's yeast, Nooca lagu daro Rootiga), ama uu horay uga qaaday alarjia tallaalka Hepatitis B.

Haddii qofku jirran yahay waqtigii la rabay inuu sugaa inta uu ka bogsanayo. Lama siin karo tallaalka qof jirran.



Haddii aad u baahantahay war dheeraad ah la xiriir dhakhtarkaaga ama kal-kaaliyaha caafimaad-kaaga.

5**Maxay tahay khatarta ka imankarta tallaalka hepatitis B?**

Sida daawooyinka kale, tallaalku wuxu keeni karaa dhibaatooyin waaweyn, oo ay ka mid tahay alarjia jirka oo qoonsada. Laakiin sida caadiga ah aad bay u yartahay khatarta ku jirta tallaalka inuu keeno geeri ama dhibaato.

Way ka fiican tahay inuu qofku qaato tallaalka Hepatitis B marka loo eego inuu qaado jiradda Hepatitis B.

Sida caadiga ah dadka tallaalka Hepatitis B qaataa wax dhibaato ah kalama kulmaan.

Dhibaatooyin YARYAR

- Meesha irbadda lagu duray oo qofka xanuunta. Xanuunkasi wuxu socda maalin ama laba maalmood (mid 11kii caruurta iyo dhalinta, dadka waaweyn mid afartii qof).
- Xummad khafiif ah ama dhexdhexaad ah (Afar iyo tobankii carruur ah mid, dadka waa weyn boqolkii mid).

Dhibaatooyin waa weyn

- Alarjia halis ah (waa dhif iyo nadir).

6**Maxaa la qabtaa haddii la arko alarjia meel dhexaad ah ama mid halis ah?****Maxaa loo baahan yahay inla fiiriyo?**

Xaalad kasta oo aan caadi ahayn sida alarjia weyn, xummad ama qandho siyaada ah ama dabiici aan caadi ahayn waa naadir in tallaalku keeno alarjia xad dhaaf ah. Haddii ay dhacdo waa

inta u dhexayso dhowr daqiiqo ilaa dhawr sacadood ka dib marka qofka la duro. Astaamaha waxa ka mid ah. Neefsashada oo adkaata, xabeeb ama hiinraagid, furuuruc, wejiga oo dhiig yari ka muuqato, tabar darri, wadnaha oo xawli sare u shaqeeya.

Maxaan qabtaa?

- Qofka jirran dhakhtar ugu yeer ama u geey.
- Dhakhtarkaaga u sheeg waxa dhacay, taariikhda dhacdada iyo waqtiga qofku tallaalka qaatay.
- Waxaad dhakhtarkaaga weydiisataa inuu Qoro warbixin ku saabsan dhacdada la Xiriirta tallaalka, Adverse Event Reporting System. (VAERS) ama la xiriir adiguba VAERS lambarka **1-800-822-7967**

7**Barnaamijka qaranka ee magsiinta marka dhaa-wac tallaalka yimaado**

Haddi adiga ama ilmahaaga dhibaato idinka soo gaarto tallaalka, waxad ogaata inuu jiro barnaamij qarameed oo ku saabsan daryeelka iyo magsiinta qofka ay waxyeello ku gaarto tallaalka.

Si aad u hesho faahfaahinta magdhowga qarameed ee dhaawaca tallaalka la xiriir teleefanka **1-800-338-2382** ama daawo websaytka <http://www.hrsa.gov/osp/vicp/>

8**Sidee u heli karaa war dheeraad ah?**

- Weydii dhakhtarkaaga si uu kuu siiyo qoraal ku saabsan tallaalka ama uu kuu tuso ila kale oo wargelin ah.
- La xiriir qaybta caafimaadka ee gobolkaaga ama degmaadaada kuwa u xilsaaran barnaamijka ka hortegida cudurrada.
- La xiriir xarunta kantroolka iyo is-hortaagidda cudurrada (Centers for Disease Control and Prevention CDC):
 - Call 1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)
 - Booqo websaytka barnaamijka tallaalka ee qaranka @ <http://www.cdc.gov/nip> ama xarunta koontaroolka cudurrada qaybta fayruska hepatitiska ee websaytkeedu yahay <http://www.cdc.gov/hepatitis>



U.S. DEPARTMENT OF HEALTH & HUMAN SERVICES
Centers for Disease Control and Prevention
National Immunization Program

Vaccine Information Statement
Hepatitis B (7/11/01) - Somali 42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Minnesota Department of Health